

# YUU WAX TARAA BARNAAMIKANI?

Caruurta iyo dhaliinyarada 22 sano da'doodu ka yartahay oo aan wali ka qalin jabin dugsi sare ama aanan haysan shahaado u dhiganta dugsi sare ayaa u qalanta barnaamijka beeraleyda waa hadii ay mardhaw soo guureen.

- Degmada dugsiiga uu ku yaalo;
- Sadexdii sano ee la soo dhaafay dhexdood;
- Waalid ama mas'uul la socda qofka ama hadii uu qofku yahay kaligii; iyo
- In shaqadu ahaataa mid ku meel gaar ah ama la xiriirta beero ama kaluumeysi

Shaqada waa in ay ahaataa mid toos ula xiriirta falashada beeraha, caanaha xoolaha, hilibka, kaluunka ama dhaqashada xoolaha. Wax jinsi ama midib, dhaqaalo, luuqad kuma xirno u qalmida barnaamijka beeraleyda (MEP).



SCAN ME

## KA FAKAR CANUGAAGA IN UU U QALMO?

Hadii aad is leedahay in uu canugaaga u qalmo, fadlan la soo xiriir shaqaalaha barnaamijka beeraleyda ee ku xusan dhambaalkani. Waxaa ku soo booqandoona shaqaale ka socda MEP, Kala hadal in adiga iyo canugaaga aad heli kartaan adeeyo waxqabad, balse waxaa muhiim ah in aad wacdid si aad u heshid macluumaad badan. Wicintaanka shaqaalaha barnaamijka beeraleyda ma'ahan mid adiga kali ku caabinayaa, waxa uu caabinayaa oo kale qoysaska kale ee u qalma barnaamijka beeraleyda ee degan degmadaada si ay caruurtaasi u helaan caawimaada ay u baahanyihiin si ay iskuulka guul uga gaaraan. Barnaamijka MEP-da waxaa loogutalagalay in lagu caabiyo oo kaliya caruurta u qalanta. Fadlan nala soo xiriir manta.



## BARNAAMIJKA WAXBARASHADA BEERALEYDA NEBRASKA

Barnaamijka waxbarashada beeraleyda waxaa maalgalisa dowlada federaalka si looga haqabtiro baahida waxbarasho caruurta u qalanta barnaamijka beeraleyda iyo waliba wixii kale oo aaeeyo dheeri ah.



# WAA MAXAY BARNAAMIJKA WAXBARASHADA BEERALEYDA?

Barnaamijyada waxbarashada beeraleyda waa mid ay dowlada federaalka maalgaliso. Barnaamijka waxbarashada beeraleyda waxaa uu ugu deeqaa dhamaan caruurta beeraleyda ee gobolka adeegyo waxbarasho oo dheeri ah. Barnaamijka waxaa la aas aasay 1966 waxaana dib loo ansixiyay xiliyo badan, oo ay ka mid yihiin xiligii la aas aasay sharcigii oranayay canug yuusan dib u dhicin ee sanadkii 2001. Hadafka guud waa in ay caruurta (MEP) beeraleyda iyo dhaliinta yaryar ay ka faa'iideystaan waxbarashada dadweynana loogutalagalay. Si arinkan loogu guuleysto, barnaamijka waxbarashada beeraleyda waxaa loogutalagalay in uu caruurta ka kaalmeeyo carqaladaha kaga imaan kara waxbarashada guur guurista faraha badan darteed.

# YAAN CAAWIN KARNAA?

Waan ogsoonahay in ay muhiim tahay in ay waalidiinta ku lug yeeshaan waxbarashada caruurtooda. Waalidiinta waa macalimiinta koowaad ee canuga. Barnaamijka waxbarashada beeraleyda waxa uu diyaar layahay in uu canugaaga waxbarto iyo waliba sidii looga caabin lahaa waxbarashada. Ku lug lahaanshaha waalidka waxbarashada caruurtiisa waxa ay u horseedaysaa fursad waxbarasho ee xaga noloshooda.

# BARNAAMIJKANI MUXUU BIXIYAA?

Degma waliba waxa ay bixisaa adeegyo la xiriira barnaamijka beeraleyda (MEP) waxa ayna ugu deeqaan adeegyadaasi caruurta u qalanta. Adeegyadaasi waxbarasho waxaa ka mid ah kuwa soo socda:

- Barnaamijyada xanaanada ama naasiriga si loogu diyaariyo caruurta beeralada in ay dugsiga guul ka gaaraan
- Barnaamijyada samar iskuulka
- Barnaamijyo waxbarasho
- Barnaamijyo waxbarasho xiliga dugsiga ka hor iyo ka dambe
- Adeegyo gargaar ee qalinjabinta dugsiga sare
- Qaabab kale ee barnaamijyo waxbarasho (PASS)
- Barnaamij waxbarasho ee u dhigma Dugsi sare (CAMP)
- Barnaamijka gargaarka beeraleyda ee koleejka (CAMP)
- Sii wadida waxbarashada dugsiyada degmada iyo waliba gobolada
- Fursado deeq waxbarasho



[www.nebraska.ne.gov/migrant](http://www.nebraska.ne.gov/migrant)

# ADEEGYO HAWLAHA/ WAXQABAD

Waxaa ka mid ah kuwa soo socda:

- Guddiga Talabixinta Waalidiinta (PAC) kaas oo yeesha shirar iyo waliba ku luglaanshaha hawlaha
- La socodka iyo ka warqabka caruurta u qalanta barnaamijka beeraleyda.
- La wadaagitaanka macluumaadka ardayga marka uu gobol kale ku wareego.
- Adeegyada, caafimaadka, ilkaha, indhaha, iyo waliba adeeyada kale ee quudinta.
- U gudbinta hay'adaha kale ee degmada si uu u helo adeegyo kale
- Ugu deeqida qalab waxbarasho

# BARNAAMIJYADA WAXBARASHADA BEERALEYDA WAXAA LOOGA BAAHANYAHAY IN:

- Ay la socdaan baahida waxbarashada caruurta beeraleyda iyo sidii loo wajihi lahaa baahidooda.
- In loogu deeqo caruurta beeraleyda fursado waxbarasho oo ay kula tacaalaan aqoonta waxbarashada gobolka iyo waliba in laga haqabtiro caruurta oo dhan baahida xaga waxbarashada.
- In kor looqaado adeegyada gobolka ee caruurta beeraleyda; iyo waliba
- In lagu dhiirgaliyo caruurta beeraleyda iyo waliba qoysaskooda adeegyada tacliinta.

Sidaa darteed, waxaa loo baahanyahay in caruurta yar yar loo diyaariyo in ay bilaabaan dugsi, si ay u helaan qibrad manhaj waxbarasho si ay uga sii gud-baan aqoonta dugsi sare ama ay u helaan shaqo.